



*The Federal Government of the Somali Republic*  
**Office of the Prime Minister**

Ref: XRW/

TAARIKH Janaayo 10, 2013

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka ah ee Soomaaliyeed.**

**Markuu arkay:**

In loo baahan yahay in dib loo eego xilalka qaab- dismeedka Wasaaradaha qaarkood,

**Markuu arkay:**

Markii ay soo gaareen Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha in baahi loo qabo in la kala qeexo hawlaha Wasaaradaha qaarkood;

**Markuu fix-geliyey:**

Markii uu la tashi buuxa la sameeyey dhinacyo kala duwan oo xog-oggaal u ah farsamada maamulka dowladda;

**Marku fix-geliyay:**

Qodobada 97, 99, 100 ee Dastuurka Jamhuuriyadda Soomaaliyeed

**Wuxuu soo saaray Xeerkan:**

**Qodobka 1-aad**

**Waxaa is-beddel lagu sameeyey magacyada wasaaradaha soo socdo:**

- Wasaaradda Arimaha Dibadda** waxaa hadda kadib ay noqon doontaa **Wasaaradda Arimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga**, waxaana la raaciyay howlihii iskaashiga Caalamiga ah.
- Wasaaradda Warfaafinta, Boostada iyo Isgaarsiinta**, waxaa hadda kadib ay noqon doontaa **Wasaaradda Warfaafinta, Isgaarsiinta iyo Gaadiidka**.
- Wasaaradda Howlaha Guud, Gaadiidka iy Dekedaha**, waxay hadda ka dib ay noqon doontaa **Wasaaradda Howlaha Guud, Dekedaha Iyo Gaadiidka Badda**, waxaana la raaciyay hawlihii dhalinta iyo qaybihii korontada.

**Qodbka 2-aad**

Dhammaan howlihii la xiriiaray **Dalxiiska iyo Duurjoogta** waxay si KMG ah u hoos tagayaan **Xafiiska Raiisulwasaaraha**.

**Qodobka 3-xaad**

Wasiirada, Wasiiru-dowlayaasha iyo Wasiir-ku-xigeenada Wasaaradahaasi wax isbedel ah laguma samayn.

**Shaqo Wacan**